Faallo Kooban 04

Qiimeyn hindise-sharciyeedka doorashooyinka qaranka Soomaaliya

MAHAD WAASUGE & PARTHA MOMAN

Luulyo 2019

Soo koobid

Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxa uu ku jiraa dib-u-eegista baarlamaan. Marka la ansixiyo, sharciga waxaa uu aasaas u noqon doonaa doorashoooyinka qaran ee qof iyo codka ah ee la qorsheynayo in ay ka dhacaan Soomaaliya dhammaadka 2020 iyo horraanta 2021. Sharcigu waxaa uu ka kooban yahay 7 cutub iyo 61 qodob, waxaa uuna ka hadlayaa arrimaha qaabeynta doorashada, hababka maamulka, diiwaangelinta cod bixiyeyaasha, musharaxnimada, ololaha doorashada, hababka cod bixinta, iyo cod tirinta. Faalladaan kooban waxa ay si faahfaahsan qiimeyn ugu sameyneysaa arrimaha farsamo ee qaabeynta doorashada ee ku jira sharciga oo ay ka mid yihiin diiwaan gelinta cod bixiyeyaasha, qoondeynta kuraasta, ku dhawaaqista natiijooyinka doorashada, xallinta murannada, madaxbannaanida Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo kormeerka doorashada. Waxaa ay sidoo kale faalladan falanqeyneysaa qaabdhismeedka maamul dimuqraadi ah ee Soomaaliya ka hanaqaada (doorashada madaxweynaha, doorashada Aqalka Sare iyo dib-u-dhaca doorashada). Waxa ay warbixintu soo jeedineysaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.com

© 2019 Somali Public Agenda

Hordhac

2-dii bishii Maajo ee 2019, Golaha Wasiirrada ayaa ansixiyey Sharciga Doorashooyinka Qaranka iyo sharciga xisbiyada siyaasadeed ee dib-u-eegista lagu sameeyey. Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxaa loo gudbiyey Golaha Shacabka, waxaa uuna hadda marayaa akhrin baarlamaan. Marka uu Golaha Shacabku ansixiyo, sharcigu waxaa loo gudbin doonaa Aqalka Sare si ay akhrin iyo dib-u-eegis ugu sameeyaan ka hor inta aanu ansixinin madaxweynaha.

Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxa uu udub dhexaad u yahay dhowr sharci oo lagama maarmaan u ah doorashooyinka baarlamaan iyo madaxweyne. Sharciga ayaa faafaahinta ugu ballaaran ka bixinayaa dhinacyo badan oo maamulka doorashada ah, balse waxaa si wanaagsan loogu fahmi karaa marka lagu akhriyo Sharciga Xisbiyada Siyaasadda, Sharciga Gudiga Doorashada (2015), iyo qodobada la xiriira doorashada ee ku jira dastuurka kumeelgaarka ah (2012). Sharciga Doorashooyinka Qaranka waa isbeddel sharci dejin oo muhiim ah oo u baahan baaritaan dhab ah iyo latashi dadweyne si loo xaqiijiyo in sharcigu xoojinayo dimuqaadiyadda iyo maamul wanaagga. Faalladaan kooban waxaa la qorey iyadoo maskaxda lagu hayo ujeeddadaas.

Dulmar guud ee sharciga

Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxaa uu ka kooban yahay 7 cutub iyo 61 qodob.

1. Cutubka 1-aad (qodobada 1-5) waxaa uu qeexayaa ujeeddada sharciga waxaa uuna xoojinayaa in uu waafaqsan yahay dastuurka.
2. Cutubka 2-aad (qodobada 6-14) waxaa uu ka hadlayaa hababka maamulidda doorashada oo ay kamid yihiin: awoodaha iyo masuuliyadaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka; aasaasidda iyo maamulidda xafiisyada doorashooyinka iyo xarumaha cod bixinta; nooca doorasho (liiska xiran ee matalaadda isku dheelitiran); hannaanka doorashada madaxweynaha iyo labada gole ee baarlamaanka; iyo taariikhda doorashada.
3. Cutubka 3-aad (qodobada 15-23) waxaa uu sharxayaa nidaamka diiwaangelinta codbixiyeyaasha kaasoo ah biometrik iyo sida liiska codbixiyeyaasha loo sameynayo.
4. Cutubka 4-aad (qodobada 24-33) waxaa uu qeexayaa: shuruudaha laga rabo musharixiinta in ay buuxiyaan (in uusan ka yareyn 25 sano iyo in musharax kasta uu bixiyo lacag dhan $2,000); ololaha doorashada; kaalinta xisbiyada siyaasadda oo ay ka mid tahay matalaada haweenka ee liiska xisbiga; iyo soo gudbinta liiska musharraxiinta.
5. Cutubka 5-aad (qodobada 34-44) waxa uu ka hadlayaa u diyaargarowga doorashada iyo habka codeynta.
6. Cutubka 6-aad (qodobada 45-53) waxaa uu faafaahinayaa habka tirinta codadka iyo xaqiijinta natiijooyinka doorashada.
7. Cutubka ugu dambeeya ee 7-aad (qodobada 54-61) waxaa uu sharxayaa waxa ka dhalan kara jebinta sharciga, dib-u-dhaca doorashada iyo ammaanka.

Arimaha farsamo ee qaabeynta doorashada

Sharciga Doorashoyinka Qaranka waxaa uu faafaahinayaa arrimaha farsamo ee qaabeynta doorashada, sida diiwaangelinta, jaangoynta kuraasta iyo tirinta codadka. Hase yeeshee, waxaa jira madmadow iyo khaladaad ku jira sharciga oo ka hor imaanaya in la qabto doorashooyin loo dhan yahay laguna kalsoon yahay.

Caqabadaha diiwaan-gelinta cod bixiyeyaasha

Nidaamka diiwaangelinta cod bixiyeyaasha ee Soomaaliya waxa ay tahay in uu xisaabta ku darsado dhowr caqabadood oo ay ka mid yihiin: tirakoob la'aan; maqnaanshaha nidaam aqoonsi oo qaran; amni darro; kaabayaasha oo aan diyaarsaneyn; iyo heerarka hooseeya ee akhris iyo qoral ee dadweynaha. Sharciga Doorashooyinka Qaranka gaar ahaan (qodobka 17[5]) oo faraya in si biometric ah loo diiwaangeliyo codbixiyeyaasha waa mid ku habboon xaaladahan maadaama aan muwaadinka looga baahneyn qoraallo iyo aqoon. Nidaamka diwaangelinta biometrik-ga ah waxaa si guul ah loo tijaabiyey doorashooyinkii madaxweyne ee sanadkii 2017 ka dhacay Somaliland (Walls, et al., 2017) waxaa uuna la mid yahay nidaamyada hay'adaha gargaarka bani'aadanmada ka shaqeeya ay u isticmaalaan diiwaan gelinta dadka ka faa'ideysta, oo ay isticmaaleen dad badan oo jooga goobaha ay aabaraha saameeyeen (World Food Programme, 2017).

Isticmaalka tiknoolojiyadda casriga ah ayaa sidoo kale noqon karta dhibaato haddii GMDQ aanay haysan dhaqaale iyo howlwadeenno ku filan si ay u xaqiijiyaan diiwaangelin habboon oo loo isticmaalo doorashooyinka xiga (UNDP, 2014). Diiwaangelin biometrik ah oo guuleysata waxa ay Soomaaliland ku qaadatay toban sano iyo isku dayo dhowr ah (Walls, et al., 2017); diiwaangelinta noocan ah waxa ay ka shaqeyn weysay Afganistaan (Worden, 2018).

Dhab ahaantii, Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxaa uu aqbalsan yahay culeyska ay leedahay in la dhaqan geliyo tijnoolojiyad noocaas ah, waxa uuna si aan caddeyn ugu jeedinayaa GMDQ in ay go'aansadaan nooc kale oo diiwaangelin (qodobka 17[6]) haddii loo baahdo. Tani waxa ay albaabada u fureysaa in la sameeyo nidaam diiwaangelineed oo aan laheyn ka baarandegid iyo daahfurnaan ku filan, sharciga aanan lagu xusin, lagaana yaabo in ay yareyso kalsoonida lagu qabo doorashooyinka – hannaan diiwaangelin hooseeya waxaa ka dhalan kara hab dhaqan doorasho oo aan wanaagsaneyn sida ku shubashada codadka iyo in hal qof uu dhowr meel ka codeeyo (UNDP, 2014).

Qodobada ka hadlaya diwaangelinta codbixiyaasha waxa ay sidoo kale codbixinta ka saarayaan qeybo qaar oo ka mid ah dadweynaha. Sharcigu ma caddeynayo qaabka loo diiwaangelinayo ciidanka qaranka ee ku sugan furumaha hore, qurbajoogta, qaxootiga iyo diblomaasiyiinta ku sugan dalka dibaddiisa. Waxaa intaa dheer, qodobka sheegaya in codbixiyaashu ay keliya ka codeyn karaan goobta laga diiwaan geliyey waxaa uu meesha ka saareysaa suurtagalnimada in ay codeeyaan dadka guurguura sida barakacayaasha iyo xoolo dhaqatada.

Habka qoondaynta kuraasta

Qodobka 11(1) waxa uu soo jeedinayaa "Matelaadda Isu-dheellitiran ee Liiska Xiran" iyo hal degmo qaran in uu noqonayo nooca doorasho ee dalka. Noocan doorasho waxa ku heshiiyay dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada kulankii Golaha Amniga Qaranka ee ka dhacay Baydhabo bishii Juun 2018.

Inkastoo noocan doorasho uu ku habboonaan karo Soomaaliya, mid kamid ah arrimaha muhiimka ah ee uu sharciga doorashooyinka ka hadlayo waa sida loo dhaqan gelinayo metelaadda isu-dheelitiran. Marka codadka lasoo uruuriyo lana tiriyo, tirada codadka waa in loo beddelaa kuraas ay helaan xisbiyada siyaasadda. Qodobka 52(4) waxa uu soo jeedinayaa in la isticmaalo qaaciddada Saint-Lague marka la tirinayo kuraasta baarlamaanka. Marka la isticmaalayo qaaciddadan, kuraasta waxa lagu qeybinayaa tirin dhowr wareeg ah, wareeg kastana wadarta codadka uu helay xisbiga ayaa loo qeybinayaa mid kamid ah tirada kinsiga ah (1, 3, 5, 7, …) iyadoo lagu saleynayo tirada kuraasta. Wareeg kasta xisbiga leh tirada ugu badan waxa uu helayaa kursi. Noocan kuraas qeybin waxa loo yaqaannaa pure Saint-Lague, oo ay dalal aad u yar isticmaalaan. Waxa uu u janjeeraa xisbiyada heerka dhexe. Waxana arrinkan sii xoojinaya in ugu yaraan cod u dhigma 7% (qodobka 13aad) ay heystaan xisbiyada si ay kuraas u helaan.

Arrinta tixgelinta gaarka ah mudan ee dimoqraadiyadda Soomaaliya marka la eego qoondeynta kuraasta waa u janjeeridda xisbiyada waaweyn iyo dhiirrigelinayo iskaashiga ama u janjeeridda xisbiyada yaryar iyo dhiirrigelinta metelaad kala duwan (Gallagher, 1992). Noocyada kale ee lagu beddeli karo halbeegga qoondeynta kuraasta ee sharciga doorashooyinka waxaa kamid ah modified Saint-Lague (waxa uu yarenayaa saamiga guud ee kuraasta waxana uu tirada koowaad ee 1 ee pure Saint-Lague ku beddelayaa 1.4) oo ay inta badan isticmaalaan dalalka Scandinavian-ka waxana uu isagana u janjeeraa xisbiyada waaweyn (Farrel, 1997). Nooc kale ayaa ah d'Hondt (qeybiyayaasha nidaamka d'Hondt waa 1, 2, 3, 4) waxana loo isticmaalaa doorashooyinka Baarlamaanka Yurub waxana uu u janjeeraa xisbiyada waaweyn (Kotanidis, 2019). Nooca "largest remainder" ayaa ah nidaam kale oo "qoondo" lagu qeybinayo codadka kursi kasta ee kuraasta wareegga hore. Kuraasta soo hartay ayaa qoondadooda lagu saleynayaa codadka soo haray. Hababka nidaamka largest remainder waxaa kamid ah Hare quota (tirada codadka ayaa loo qeybiyaa tirada kuraasta) waxa ay soo saartaa natiijo u roon xisbiyada yaryar (Farrel, 1997).

Ma jiro nidaam sax ah ee loo qoondeeyo kuraasta. Muhiimadda ah ayaa ah in nidaamka kuraas qeybin ee la qaato uu ka turjumayo nooca dimuqraadiyad oo ay Soomaaliya dooneyso – oo ah mid ay ka dhalaneyno dowlad shaqeyneysa, xasiloon, balse dadka laga tirade badan yahay aanay qeyb ka ahayn ama dowlad jilcan balse loo dhan yahay oo ay dad badan ku jiraan. Hadda, waxaa lagu doodi karaa in Saint-Lague iyo saamiga 7% oo is biirsaday aanay ka turjumeynin baahida loo qabo kamid ahaanshaha dowladda maadaama Soomaaliya ay u baahan tahay in la xoojiyo dib-u-heshiisiinta.

Mugdiga ku jiro ku dhawaaqista natiijooyinka

Sharciga Guddiga Doorashooyinka ayaa awood u siinaya Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka in ay si rasmi ah ugu dhawaaqaan natiijada doorashada, balse Sharciga Doorashooyinka Qaranka (qodobka 7f) waxa uu farayaa in "maxkamadda awoodda u leh" ay si kumeelgaar ah u ansixiso natiijada uu soo gudbiyay GMDQ, taasoo abuureysa mugdi ku aaddan cidda ugu dambeyn ku dhawaaqeysa natiijada. Sidoo kale, qodobka 6-10 ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee ka hadlaya kaalinta GMDQ ee maamulka doorashada waxa ay lamid yihiin qodobbo dhowr ah oo ku xusan Sharciga Guddiga Doorashooyinka ee 2015, taasoo ah soo celcelin aan loo baahneyn.

Qaababka xallinta khilaafaaska oo aan caddeyn

Hannaanka xallinta khilaafaadka iyo cabashooyinka doorashada ayaanan caddeyn. Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxa ku jira qodob aan caddeyn oo dhahaya "maxkamadda awoodda u leh" ayaa go'aan ka gaareysa cabashooyinka iyo murannada la xiriira doorashada. Qodobkan waxa uu ka hor imaanayaa qodobka 14-aad ee Sharciga Guddiga Doorashooyinka kaasoo awood u siinaya GMDQ in ay xalliyaan murannada ka dhasha doorashooyinka Golaha Shacabka, Aqalka Sare iyo Madaxweynaha.

Madaxbannaanida GMDQ

Dhowr qodob oo ku jira Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayaa wiiqaya madax-bannaanida Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka. Qodobka 14(2) waxa uu sheegayaa in GMDQ uu soojeedinayo wakhtiga doorashada kadibna uu madaxweynaha ku dhawaaqayo. Sidoo kale qodobka 18(2) waxa uu qorayaa in uu madaxweynaha ku dhawaaqayo billaabashada diiwaangelinta codbixiyayaasha kadib marka uu dhageysto GMDQ. Labadan qodob waxa ay wiiqayaan madax-bannaanida GMDQ waxana ay awood siinayaan madaxweynaha talada haya oo ay u badan tahay in uu u sharraxan yahay xafiiska ugu sarreeya dalka. Ugu dambeyntii, qodobka 22-aad oo Wasaaradda Arrimaha Gudaha siinaya kaalin xaqiijin ee diiwaangelinta codbixiyayaasha waxa uu u baahan yahay in si taxadir leh dib-u-eegis loogu sameeyo maadaama ay hannaanka diwaangelinta ku noqon karto faragelin siyaasadeed.

Maqnaanshaha qodobo ka hadlaya korjoogteynta doorashooyinka

Sharciga doorashooyinka ma caddeynayo kaalinta kormeerayaasha dalka iyo kuwa caalamiga ah ee korjoogteynta hannaanka doorashada. Sharciga Guddiga Doorashooyinka waxa uu sheegayaa in ay tahay kaalinta GMDQ in la magacaabo lana oggolaado kormeerayaal, balse faafaahin dheeraad ah ma bixinayo.

Arrimaha la xiriira qaab-dhismeedka nidaamka dimuqraadiga Soomaaliya

Diyaarinta doorashooyinka dalka waxa lagu howlan yahay iyadoo aanu dhameystirneyn dastuurka, waana caqabad inta badan ka jirta dalalka colaadaha kasoo baxaya (Underwood, et al., 2018). Nooca doorasho waxaa la qoray iyadoo aanay kala caddeyn qaabka ay noqon doonaan hay'adaha dalka, islamarkaana doodo iyo dib-u-eegis ay ku socdaan qaab-dhismeedka dowladda (sida nidaam madaxweyne mise mid baarlamaan) iyo nooca iyo awoodaha baarlamaanka (hal aqal mise labo aqal) kuwaasoo saameyn weyn ku leh naqshadeynta doorashada. Maadaama arrimahan weli laga doodayo, waxaa jira khatar ah in uu qabyatirka iyo dhameystirka dastuurka ka dhigi karo qodobo kamid ah Sharciga Doorashooyinka Qaranka kuwo aan shaqeyn ama aan dastuurka waafaqsaneyn. Sidoo kale, waxa uu dhowr arrin oo ku jira Sharciga Doorashooyinka Qaran ka dhigayaa kuwo u baahan dood iyo falanqeyn si loo xaqiijiyo in ay waafaqsan yihiin hiigsiga Soomaaliya ugu jirto dimoqraadiyeynta.

Doorashada Madaxweynaha

Qodobka 12-aad ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayaa ka hadlaya doorashada madaxweynaha. Waxa uu qodobka sheegayaa in musharaxa madaxweyne ee xisbiga siyaasadeed oo ku guuleysta kuraasta ugu badan ee baarlamaanka (ama si toos ah ha ugu guuleysto ama isbaheysi uu la sameeyay xisbiyo kale) in uu noqonayo madaxweynaha dalka.

Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayaan kala caddeynin in codadka baarlamaanka la xisaabinayo ay ku saleysan tahay isu-geynta kuraasta Golaha Shacabka iyo Aqalka sare ama Golaha Shacabka oo kaliya.

Qodobkan waxa uu khilaafsan yahay qodobka 89-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah, kaasoo faahfaahinaya qaabka doorasho ee madaweynaha oo ah in labada gole ee baarlamaanka ay dooranayaan iyadoo loo marayo wareegyo codeyn. Dastuurkana ma sheegayo in musharraxa madaxweyne uu xubin ka yahay xisbi siyaasadeed.

Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayaa muujinaya in ay dib-u-eegis ku socoto dastuurka, waxa uuna bixinayaa tilmaam ah in guddiyada ku howlan dib-u-eegista dastuurka ay wax-ka-beddel ku sameyn doonaan qodobada la xiriira doorashada madaxweynaha islamarkaana waafajin doonaan qodobbada sharcigan. Waa xaqiiq qodobada ku jira dastuurka ee ka hadlaya doorashada madaxweynaha in loo baahan yahay in wax-ka-beddel lagu sameeyo, balse qaabshismeedka dowladnimo ee la qaadanayo–nidaam madaxweyne, mid baarlamaan, ama mid isku dhafan – ma ahan mid cad. Waxa ay kamid tahay arimaha laysku khilaafsan yahay ee dastuurka ku jira oo u baahan dood iyo wadar oggol, mana ahan arin si fudud loogu xalin karo Sharciga Doorashooyinka Qaranka.

Doorashada Aqalka Sare

Sharciga Doorashooyinka Qaranka ma aanu kala caddeynin farqiga u dhexeeya doorashada Aqalka Sare iyo midda Golaha Shacabka – qodobka 13-aad kaliya ayaa xusaya in qaabka doorashada Aqalka Sare ay noqon doonto sida ku xusan qodobka 72(c) ee Dastuurka Kumeelgaarka ah, faahfaahin ku filanna kama bixinnin. Hadda, waajibaadka Aqalka Sare, sida ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka, waa in ay ilaaliyaan danaha maamul goboleedyada, balse kuma jiraan sharcigan qodobbo caddeynaya sida loo nidaaminayo doorashooyinka Aqalka Sare.

Fikradda ah in Aqalka Sare uu ilaaliyo danaha maamul goboleedyada ayaa waxa ay cakireysaa qaabka doorashada, gaar ahaan marka la qeexayo deegaan doorashooyinka. waxaa Sharciga Doorashooyinka Qaranka laga fahmi karaa in dalka oo dhan uu noqonayo hal degmo oo ku saleysan metelaadda isku dheelitiran ee liiska xeran, sida uu dhigayay heshiiskii Golaha Amniga Qaranka ee Baydhabo ka dhacay bishii Juun 2018. Nidaamkan ayaa ah mid ku habboon dalalka colaadaha kasoo kabanaya sida Soomaaliya maadaama uu yareynayo caqabadaha hirgelinta doorashada islamarkaana dhiirrigelinayo isbaheysiga xisbiyada.

Hase yeeshee, doorashooyinka ku saleysan hal degmo doorasho ayaa noqon kara mid aanan ku habbooneyn doorashada xubnaha Aqalka Sare, haddii ay tahay in ay metelaan Dowlad Goboleedyada. In uu Aqalka Sare metelo dowlad goboleedyada ayaa u muuqata mid muhiim ah marka loo eego xiisadaha hadda ka dhex jira Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada. Deegaan doorashooyinka ayaa u baahan in ugu yaraan loo agaasimo heer Dowlad Goboleed, haddii aanan laga dhigi karin heer gobol. Arrinkan waxa ay u baahan tahay dhaqaale dheeraad ah oo lagu maamulo doorashada, in la cayimo degmooyinka doorasho, in fiiro gaar ah loo yeesho soohdinta iyo in la xakameeyo dhaqdhaqaaqa codbixiyeyaasha.

Culeysyada ka imaanaya qabashada doorashooyinka Aqalka Sare ayaa waxaa sii cakiraya mugdiga ku jira qoondeynta kuraasta Aqalka Sare. Dastuurka kumeelgaarka ah ayaa sheegaya in kuraasta lagu saleynaayo 18-ka gobol iyo in la xaqiijiyo sinnaanta tirada xubnaha Maamul Goboleedyada (The Federal Republic of Somalia, 2012). Markii lagu guda jirey doorashadii 2016-17, kuraasta waxaa loo qoondeeyay qaab aanan waafaqsaneyn dastuurka taasoo abuurtay sinaan la'aan: 11 kursi ayay kala heleen Puntland iyo Soomaaliland, waxaana min 8 Kursi helay maamullada kale, Gobolka Banaadirna wax kursi ah ma helin. Maqaamka Muqdisho oo aan la caddeynin waxa uu qoondeynta kuraasta ka dhigayaa mid adag. Sharciga Doorashooyinka Qaranka kuma jiraan qodobo xal u raadinaya arrinkan marka laga reebo qodobka 13(4) oo sheegaya in xeer gaar ah lagu faafaahin doono qoondada kuraasta Aqalka Sare.

Dib-u-dhaca doorashada

Waxaa jira caqabado badan oo ay tahay in laga gudbo kahor inta aanay doorasho dhicin, waana caqabado ay u badan tahay in ay doorashada dib-u-dhac ku keenaan. Ansixinta Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Golaha Wasiirrada iyo akhrinta baarlamaanka ku wadaan waa tallaabo aad loogu baahnaa ee loo qaaday dhanka dimoqraadiyadda Soomaaliya. Hase yeeshee, akhrinta iyo ansixinta sharciga ayaa wakhti qaadaneysa maadaama uu marayo saddex akhrin ee Golaha Shacabka ah, iyo akhrin kale ee Aqalka Sare ah kahor inta aanu ansixinin Madaxweynaha. Intaa waxaa dheer, xisbiyada siyaasadda waa in si rasmi ah loo diiwaangeliyaa kadib marka ay soo buuxiyaan shuruudaha ku qoran sharciga xisbiyada siyaasadda.

In la hrgeliyo hannaan doorasho ayaa sidoo kale u baahan wakhti. Sharciga doorashooyinka ee qabyada ah waxa uu soo jeedinayaa in la sameeyo diiwaangelin codbixiyayaal oo biometrik ah iyo in ay GMDQ diyaariyaan liiska codbixiyayaasha oo dhameystiran labo bil kahor doorashooyinka. Diiwaangelinta codbixiyayaasha, sida aan kor kusoo xusnay, waa howl adag oo u baahan sanado. Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxa uu sidoo kale qeexayaa muddada ay soconeyso ololaha doorashada oo ka bilaabaneysa 45 maalmood kahor doorashada kuna eg 48 saacadood kahor maalinta doorashada. Howlahan oo dhan waa in ay ku qabsoomaan kahor 27-ka Disembar 2020 oo ay 17 bilood ka dhiman tahay.

Qodobka 56-aad e Sharciga Doorashooyinka Qaranka waxa uu qeexayaa duruufaha sababi kara in ay doorashada ka dib dhacdo wakhtigeeda. Duruufaha uu qodobkan xusay waxaa kamid ah nabadgalyo darro baahsan, aafooyinka dabiiciga ah sida dhul gariirka iyo cudurrada faafa, abaaro baahsan iyo fatahaadaha webiyada iyo duufaanta iyo wax kasta oo lagu tilmaami karo musiibo qaran. Isla qodobkan ayaa sidoo kale sheegaya in mid kamid ah sababaha ay doorashooyinka dib ugu dhici karaan ay kamid tahay haddii "aanay farsamo ahaan u qabsoomi karin". Inkastoo aafooyinka dabiiciga ah ay yihiin sababo maangal ah oo ay doorashooyinka dib ugu dhici karaan, xaqiiqda ah in hirgelinta doorashada ay adag tahay in ay farsamo ahaan ku dhacdo muddo 17 bilood ah gudahood waxa ay micnaheedu tahay in sharciga ay ka dhalan karto dib-u-dhac doorasho oo aan wakhtiyeysneyn.

Haddii doorashada ay dib u dhacdo, sharciga sooma jeedinayo muddada la kordhinayo. Qodobka 56-aad waxa uu sheegayaa in haddii ay doorashada dib u dhacdo, in xubnaha baarlamaanka ay howshooda sii wadan doonaan muddada madaxweynahana ay ka kordhi doonto muddada baarlamaanka. GMDQ ayaa kadib ku dhawaaqi doono wakhtiga la qaban doono doorashada. Qodobkan waxa uu kamid yahay qodobbada ugu xasaasisan sharciga.

Intaa waxaa dheer, sharciga doorashooyinka kuma cadda dariiq kale ee doorasho haddii doorasho qof iyo cod ah ay ku qabsoomi weydo wakhtigeeda. Arrinkan waxa ay abuuri kartaa xasarad siyaasadeed oo ay maamulka talada haya, iyadoo aanan loo eegeynin guulihiisa iyo guuldarrooyinkiisa, ku adkaato in uu si habsami leh dalka u maamulo soona wajahaan caqabado dhanka sharciyadda ah.

Talooyin mudan in ay tixgeliyaan xildhibaannada

1. Diiwaangelinta codbixiyayaasha

- Waa in Sharciga Doorashooyinka Qaranka lagu qeexaa hannaan ka duwan diiwaangelin 'biometric' ah. Haddii la waayo qaabab kale oo laysku halleyn karo marka loo eego xaaladda hadda lagu jiro, mas'uuliyiintu waxay tixgelin karaan samaynta doorasho xal u noqon karta mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan diiwaangelinta, sida in lasoo saaro kaararka aqoonsiga qaranka ama in la sameeyo tirakoob.
- Waa in qodobo gaar ah lagu daraa sharciga kuwaas oo faahfaahinaaya sida Soomaalida ku nool dibadda (qurba-joogta iyo diblomaasiyiinta) iyo ciidamada qalabka sida lagu diiwaangelinayo kuna codeynayaan.
- Waa in la xaqiijiyaa ka qayb-galka dadka reer guuraaga ah iyada oo aan lagu xadidaynin kaliya inay ka codeeyaan goobta ay iska diiwaangeliyeen.

2. Qeybinta kuraasta

- Dib-u-habayn iyo sababeyn ha lagu sameeyo habka qoondeynta kuraasta iyadoo la eegayo mustaqbalka fog ee dimuqraadiyadda Soomaaliya. Isticmaalka habka largest remainder iyo Hare quota ayaa laga yaabaa inay ku habboon tahay Soomaaliya maadaama ay fursad siinayaan xisbiyada yar yar, gaar ahaan haddii lagu lammaaniyo in shardiga boqolleyda xisbiga ku helayo kuraasta la yareeyo lagana dhigo 4%.

3. Ku dhawaaqista natijada

- Dib-u-eegis ha lagu sameeyo madmadowga ku jira sharciga ee ku dhawaaqista natiijada rasmiga ah. Si aanan loo

khilaafin sharciyada kale, waa in uu GMDQ lahaadaa awoodda ku dhawaaqista rasmiga ah.

4. Xalinta khilaafaadka

- Waa in la caddeeyo qaabka xallinta khilaafaadka ka dhalan kara natiijooyinka doorashada. Marka la eego tabarta hay'adaha caddaaladda Soomaaliya, waxaa la doorbidi karaa in sare loo qaado kaalinta GMDQ ee xallinta khilaafaadka. Marka la dhiso maxkamad dastuuri ah oo shaqaynaysa, waajibaadka rasmiga ah ee maxkamadaha waa in si cad markaas loo caddeeyo.

5. Madax-bannaanida GMDQ

- Ha la xaqiijiyo madax-bannaanida iyo sharciyadda GMDQ iyada oo wax laga beddelayo qodobada sheegaya in uu madaxweynaha awood u leeyahay go'aaminta taariikhda doorashada iyo bilowga diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha.
- Ha la caddeeyo in kaalinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha ay tahay mid ku eg fulin farsamo oo aanay awood u lahayn kala-shaandheynta diiwaangelinta si looga fogaado faragelin siyaasadeed.

6. Kormeerka doorashada

- In qodobbo cusub lagu daro Sharciga Doorashooyinka Qaranka kuwaasoo ka hadlaya kormeerayaasha dalka iyo kuwa caalamiga ahba si loo caddeeyo sida ay fursad ugu heli lahaayeen, loo ilaalin lahaa dhexdhexaadnimadooda, looguna ixtiraami lahaa.

7. Xiriirka ka dhexeeya dib-u-eegista dastuurka iyo doorashooyinka

- **Xulashada 1-aad**: In la gaaro heshiis loo wada dhan yahay oo ah in doorashooyinka socda ay ku dhacaan qaab-dhismeedka ku qoran dastuurka kumeelgaarka ah, sidaa darteedna la hubiyo in Sharciga Doorashooyinka Qaranka la waafajinayo dastuurka.
- **Xulashada 2-aad**: In la hubiyo in Sharciga Doorashooyinka Qaranka uu xisaabta ku darsanayo in qabyatirka dastuurka uu saameyn weyn ku yeelan doono nooca doorasho, sidaas darteedna qodobbada sharciga in ay noqdaan kuwa la beddeli karo aqbalina karo natiijada wax-ka-beddelka dastuurka, iyo sidoo kale in la tilmaamo goorta iyo sida qodobada dheeraadka ah ama kuwa wax laga beddelay ee dastuurka loogu darayo sharciga.

8. Doorashada Madaxweynaha

- **Xulashada 1aad**: In la hubiyo in Sharciga Doorashooyinka Qaranka uu si buuxda u waafaqsan yahay hannaanka doorasho ee ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka ah.
- **Xulashada 2-aad**: In la hubiyo in Sharciga Doorashooyinka Qaranka uu yahay mid dabacsan oo u furan in uu aqbalo qaab-dhismeedka laanta fulinta ee lagu go'aamiyo dib-u-eegista dastuurka.

9. Doorashada Aqalka Sare

- In qodobbo lagu daro Sharciga Doorashooyinka Qaranka oo sheegaya sida doorashada degmooyinka loogu qeexi lahaa u codeynta murashaxiinta Aqalka Sare, haddii ay tahay in uu aqalku metelo Dawlad Goboleedyada, sida ku xusan Dastuurka Kumeelgaarka ah, iyo sidoo kale qodobo gaar ah oo caddeynaya nidaamka codaynta iyo qoondeynta kuraasta Aqalka Sare.
- In la garawsado ahmiyadda ay leedahay caddeynta mugdiga ku jirta qoondaynta kuraasta iyo maqaamka gobolka Benaadir, mudnaanna la siiyo wadahadal si loo hubiyo in go'aan laga gaaro arrintan loona cadaalad falo dhammaan gobollada Soomaaliya.

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS

- In la tixgeliyo suurtagalnimada in la qabto doorasho hal-qof-hal-cod ah oo ku kooban Golaha Shacabka, iyada oo loo marayo hal degmo doorasho oo heer qaran ah. Sidoo kale, xubnaha Aqalka Sare waxaa lagu sii xuli karaa nidaamka 4.5 oo heer maamul goboleed ah. In Aqalka Sare lagu doorto hanaan wadatashi, iyo in aaney ahayn wax cusub in Aqalka Sare aan la dooranin, waxay noqon kartaa isu-tanaasul waqti-gaaban si loogu oggolaado in GMDQ uu diiradda saaro doorashada Golaha Shacabka.

10. Dib-u-dhigista doorashada

- In la helo hannaan siyaasadeed oo beddel u noqon kara doorashooyinka hal-qof iyo hal-cod in lagu caddeynayo sharciga. Doorashadii dadbaneyd ee baarlamaanka 2016-ka waxa ay doorashooyinka u dadajisay caasimadaha maamul goboleedyada waxayna tirada codbixiyayaasha gaarsiisay in ka badan 14,000 oo ergo. Cashar ayaa laga baran karaa geeddi-socodkan si loo abuuro nooc doorasho oo sare loogu qaadayo hannaanka doorasho ee 2020-21 (Saferworld, 2018). Maamul kastaa waxaa uu wajihi doonaa caqabad ka dhalata aqbalaaddiisa haddii sharciyadiisu su'aal ka taagan tahay. Sidaa darteed, waa muhiim in aysan dhicin isjiidjiid muddo dheer qaata iyadoo aan la helin geeddi socod dimuqraadi ah oo lagu soo dhiso dowlad kuna yimaada wadatashi.
- Waa in si dhakhso ah loo xaqiijiyo qaabaynta doorashooyinka si looga faa'ideysto fursadaha lagu qaban karo doorasho qof iyo cod ah muddada loogu talogalay, iyadoo la sameeynayo tanaasul si taxaddar leh u dheelitira kalsoonida iyo suurtagalnimada, sida in doorashada qofka iyo codka ah lagusoo koobo Golaha Shacabka.

Tixraac

Farrel, D. M., 1997. The List of Systems of Proportional Representation. In: Comparing Electoral Systems. London: Macmillan Press Ltd, pp. 59-68.

Gallagher, M., 1992. Comparing Proportional Representation Electoral Systems: Quotas, Thresholds, Paradoxes and Majorities. British Journal of Political Science, Volume 22, pp. 469-496.

Kotanidis, S., 2019. Understanding the d'Hondt method: Allocation of parliamentary seats and leadership positions. European Parliament, June.

Saferworld, 2018. Domestic Electoral Observation Mission: Final Report on Somalia's 2016-2017 electoral process. June.

The Federal Republic of Somalia, 2012. Provisional Constitution. [Online] Available at: http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia-Constitution2012.pdf [Accessed April 2019].

Underwood, W., Bisarya, S. & Zulueta-Fülscher, K., 2018. Interactions between elections and constitution-building processes in fragile and conflict-affected states. Institute for Democracy and Electoral Assistance.

UNDP, 2014. The Role of UNDP in supporting democratic elections in Africa.

Walls, M. et al., 2017. Report by International Observers on the 2016 Voter Registration Process in Somaliland. Progressio, March.

Worden, S., 2018. Afghanistan Election Conundrum (13): New voter registry too good to be true. Afganistan Analyst Network, 28 August.

World Food Programme, 2017. SCOPE in Somalia: cash-based transfer assistance. ReliefWeb, February.

***Tixanaha Doorashada**: doorashooyin baarlamaan iyo madaxweyne ayaa la filayaa in ay Soomaliya ka dhacaan dhammaadka 2020 iyo bilowga 2021. Waxa aan bilownay qormooyin tixane ah oo la xiriira doorashooyinka. Qormo kasta waxa ay falanqeyneysaa mowduuc la xiriira doorashada. Faalladan waa middii ugu horreysay ee tixanaha. Somali Public Agenda waxa ay soo dhaweyneysaa talooyinka iyo fikradaha la xiriira doorashooyinka la filayo in ay ka dhacaan Soomaaliya.*